National Institute for Public Health
and the Environment
Ministry of Health, Welfare and Sport

Talaalka looga hortago cudurka qaaxada

Xog ku saabsan talaalka cudurka qaaxada ee BCG

Dalka Nederlaan, carruurta haysta ugu yaraan hal waalid oo ku dhashay dalka gaar ahaan meel cudurka qaaxadu uu ku badan yahay ayaa laga talaalaa cudurka qaaxada. Xaashidaan waxaa ku qoran xog dheeraad ah oo ku saabsan talaalkaan.

Waa maxay cudurka qaaxada?

Tuberculosis (TB, Cudurka qaaxada) waa cudur laga qaado bakteeriyada tuberculosis. Waxyeelada laga dhaxlo bakteeriyada qaaxada waxay saameyn xun ku yeelan kartaa carruurta yaryar marka loo eego dadka waawayn.

Maxay tahay sababta loo qaadanaayo talaalka qaaxada?

Kani waa talaalka looga hortago cudurka qaaxada. Sidoo kale waxaa loo yaqaan talaalka BCG (Bacillus Calmette-Guérin). Talaalka waxaa kujira bakteeriyada cudurka qaaxada oo la daciifiyay oo aan sababi karin xanuun. Bakteeriyadaan waxay jirka bartaa siduu u dhisan lahaa nidaam difaac oo kahortaga cudurka qaaxada.

Talaalka waxaa qaadan kara ilmaha aadka u yaryar. Talaalku si boqolkiiba 100% ah ogama hortago cudurka qaaxada. Marka uu qaato talaalka, halista uu ilmuhu ugu jiro qaadida bakteeriyada aadka u daran, sida qaaxada, qoorgooyaha, aad ayay u yar tahay. Talaalka waxaa lala qaadan karaa talaalada kale.

Yaa qaata talaalka?

Carruurta haysta ugu yaraan hal waalid oo ku dhashay dalka gaar ahaan meel cudurka qaaxadu uu ku badan yahay. Sida ku xusan diiwaanada, cunugaaga ayaa ku dhashay meeshaas.

Dadka qorsheynaaya inay muddo dheer joogaan dalka gaar ahaan meel halista saaidka ah ee cudurka qaaxadu kajirto, ama kuwa ka shaqeeya dalka ay ka jirto halista aadka u sareysa ee cudurka, ayaa sidoo kale mararka qaar lagula taliyaa inay qaataan talaalka looga hortago qaaxada. Akhri xaashida socdaalka iyo cudurka qaaxada.

Warqada casuumaada talaalka

1 Xaashida iyo casuumaada talaalka

Warqada casuumaada talaalka iyo xaashida xogta ee ku saabsan talaalka BCG ayaa laguugu soo diri doonaa boosto.

2 Balanta

Fadlan usoo sheeg laanta Adeega Caafimaadka Dadwaynaha (GGD) waqtiga loogu talagalay. Warqada casuumaada waxaa sidoo kale ku qoran waxyaabaha aad usoo qaadan karto balanta.

3 Diyaarinta casuumaada

Waxaa lagu waydiin doonaa inaad gudaha soo gasho aadna fariisato. Talaalka waxaa lagaaga duri doonaa qaybta kore ee gacanta bidix. Marka waa in qaybta kore ee gacanta ay banaan tahay. Kalkaaliyaha daryeelka caafimaadka ayaa kuu sheegi doona sida ugu wanaagsan ee loo hayo cunugaaga.

4 Cirbada talaalka

Dheecaan yar ayaa lagaaga duri doonaa maqaarka qaybta kore ee gacantaada bidix.
Kalkaaliyaha daryeelka caafimaadka ayaa kuu sheegi doona waxa aad sameyn karto iyo waxa aadan sameyn karin iyo sidoo kale waxyaabaha ay tahay inaad isha ku hayso kadib markaad qaadato talaalka. Waxaa lagu siin doonaa xaashi gaar ah oo ay ku qoran yihiin macluumaadka la xariira daryeelka aad sameyneyso kadib markaad qaadato talaalka BCG.

Muxuu cunugaagu dareemi doonaa?

Cunugaagu kuma xanuunsan doono talaalka. Haddii cunugaagu dareemo xumad aad u sareysa (qandho) isla markiiba kadib marka uu qaato talaalka, arrintaan ma ahan arrin uu sababay talaalka ee waxaa keenaya arrin kale. Boog yar, oo cassaan ah ayaa badanaa lagu arkaa kadib hal illaa 2 billood meesha cirbada lagu duray. Arrintaan mararka qaar waxay qaadan kartaa muddo intaas kasii dheer. Waxay yeelan kartaa (dhiig iyo/ama malax). Sidoo kale waxaa barari kara qanjirka qoorta ama kilkisha. Kadib marka laga soo wareego lix illaa 12 billood meesha boogta lahayd waxay isku badeli doonaa nabar.

Talaalka BCG wuxuu wax ku ool noqonayaa muddo dhowr asbuuc ah kadib marka uu qofku qaato.

Maxay tahay sababta marka koowaad loogu baahan yahay baaritaanka maqaarka (baaritaanka maqaarka ee qaaxada)?

Mararka qaar waxaa loo baahdaa in la sameeyo baaritaanka maqaarka marka koowaad. Arrintaan ayaa dhacda haddii cunugaagu banaanka dalka ku maqnaa, tusaale ahaan, ama haddii cunugaagu jiro hal ama kasii wayn yahay. Baaritaanka maqaarku wuxuu sheegayaa in cunugaagu leeyahay ama uusan lahayn nidaamka difaaca jirka ee kahortaga bakteeriyada qaaxada. Baaritaanka maqaarka wuxuu badqab u yahay carruurta.

Falcelinta xasaasiyada jirka waxaa qiimeyn lagu sameyn karaa kadib labo illaa saddex maalmood. Waxaa markaas kadib la siin karaa talaalka, ayadoo lagu saleynaayo natiijada baaritaanka.

Taageero iyo Xog dheeraad ah

Haddii ilmahagu ka soo baxo qanjidhada qoorta ama kilkilada waa muhiim inaad la xiriirto Adeegga Caafimaadka Dadweynaha ee Dawladda Hoose GGD. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa GGD Haddii aad wax walaac ah ka qabto nabarrada.

Maxaan ku sameynaynaa xogtaada?

GGD waxay xogtaada gaarka ah ee ay haysto kuna jira faylka caafimaadka u kaydisaa qaab waafaqsan sharciyada qaanuunka degsan. Xogtaada waxaa loo adeegsan doonaa qaab qarsoodi ah si loola socdo loona hormariyo tayada barnaamijka.

Ma qabtaa wax su'aalo, tallooyin, walaacyo ama bogaadin ah?

- Fadlan la xariir waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga. Waxaad xogta xiriirka ka heli kartaa www.ggd.nl iyo kaarka casuumaada talaalka. GGDs waxay leedahay hanaan lasoo gudbiyo cabashooyinka.
- Waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan cudurka qaaxada ka heli kartaa www.rivm.nl/tuberculose.

This information is available in English at:
Xogtaan oo Soomaali ah waxaa laga heli karaa:
ብቋንቋ ትግርኛ ዝተተርጕመ መልክዕ ናይ'ዚ ሓበሬታ፡ ኣብ'ዚ ዝስዕብ ገጽ ክርከብ ይከኣል፡-
هذه المعلومات متاحة باللغة العربية في هذا الموضع:
این معلومات به زبان دری در اینجا قابل دسترس است:

www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials

Published by:

National Institute for Public Health and the Environment, RIVM
PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven
The Netherlands
www.rivm.nl/en

September 2022

Committed to *health and sustainability*

014343-SOMALISCH